## Saddex Kaalmo oo La kala Dooranayo

### Gargaar Caafimaad

Medicaid Minnesota ee kaalmeeya dadka dakhligoodu yar yahay, gaar ahaan carruurta iyo haweenka uurka leh. Wax lacag ah la iskama qaadayo bishiiba.

### DaryeelkaMinnesota

Wuxuu kaalmeeyaa dadka reer Minnesota ee dakhligoodu hooseeyo oo aan awood u lahayn kaalmada daryeelka caafimaad oo laga helo loo-shaqeeyaha. Lacagta ugu badan ee qofkiiba looga qaadayo waa $50/bishiiba.

### Qorshaha Caafimaadka loo Qalmo

Kaydad canshuur ayey heli karayaan shakhsiyaad fara badan iyo qoysas, kuwaasoo intooda badan aan awood u lahayn kaalmada daryeel caafimaad ee la iska bixin karo. Si aad ugu qalantid, kaalmo gaar ah waa in la iibsadaa iyadoo loo marayo MNsure. Qiimaha kaydka canshuurtu wuxuu ku xiran yahay dakhligaaga iyo qiimaha caymiska xaafaddaada.

## Wargal ahow

mnsure.org

facebook.com/mnsure

@MNsure

MNsure

Where you choose health coverage



# Hel kaalmo caafimaad oo la awoodi adigoo u maraya MNsure





## Adeegga iyo Isku Barbardhiga

MNsure waa goob suuq oo ay dadka reer Minnesota ka adeegsan karaan, isku barbardhigi karaan meelaha kale ayna ka dooran karaan kaalmo caymis caafimaad oo baahidooda daboosha.

Dhammaan qorsheyaasha MNsure waxaa ku jira kaalmada muhiimka u ah manfacyada caafimaadka sida isbitaal gelidda, adeegyada xaaladaha degdegta, dhalmada iyo daryeelka ilmaha dhashay, daawooyinka laguu qoray, booqashooyinka ka hortagga iyo wacnaanta, caafimaadka maskaxda iyo daryeelka aragga dhallaanka.

Qorsheyaasha MNsure waxaa sidoo kale la socda difaaca macaamiisha. Adiga ma laguu diidi karo kaalmo xaalad caafimaad xumo awgeed oo horey u sii jirtay, lagaagamana qaadi karayo caymis sarreeya taariikhda caafimaadkaaga awgeed.  Ma jiraan xaddi doollar sannadle ama inta nolosha ka hartay ah.

## Hel Caawinaad Maaliyadeed

MNsure waa meesha keliya ee aad ugu qalmi kartid caawinaad maaliyadeed oo hoos u dhigi karta qiimayowga caymiskaaga bishiiba.

Iyadoo ku xiran inta qof ee guriga ku nool iyo dakhliga soo gala, ayaa inta badan dadka reer Minnesota u qalmaan barnaamij caymis dadweyne sida Gargaarka Caafimaadka ama MinnesotaCare, ama qorshe qiime hooseeya ku kacaya ee ay kaa siiso shirkad caymis gaar loo leeyahay.

**Caawino maaliyadeed waxaa lagu heli karayaa oo keliya iyadoo loo marayo MNsure.**

MNsure℠
mnsure.org 1-855-366-7873

## Caawino Bilaash ah ayaa la Helayaa

**Booqo MNsure.org, ereyga furuhuna waa: gargaare**

### Daadihiyeyaasha

Shakhsiyaad tababaran oo ka kala yimid ururro la aamminsan yahay ayaa bixinaya caawinaad weji ka weji ah oo ay kaa siinayaan codsiga iyo isku qoridda.

### Wakiillada iyo Dullaaleyda

Aqoonyahanno tababaran oo sharciyeysan ayaa kaa kaalmeynaya isku qorid fool-ka-fool ah kulana talinaya si ay kaaga caawiyaan in qorshe u dooratid.

### Xarunta Xiriirka MNsure

1-855-3-MNSURE (855-366-7873). Takhasusleyaal si buuxda loo tababaray ayaa kaaga jawaabaya su'aalaha aad qabtid.

*Isku qoriddu waxay furan tahay Nofembar 15, 2014 ilaa iyo Febaraayo 15, 2015*